

Familjeklass

Om ni har frågor och funderingar välkommen att höra av er till:

Rada Marhosevic

Förstelärare

radmar@linkoping.se

Maria Lundin

Biträdande rektor

rialun@linkoping.se

013-208728

Hasse Hansson

Resurspedagog


hashan@linkoping.se

Henrik Sävmo

Rektor

Hensav@linkoping.se

013-262682



- **Ku soo dhawow fasalka qoyska ee Bäckskolan.**

- Wacanaa in aad timaadaan oo aad ka qeyb-qaadataan faslka qoyska ee Bäckskolan! Waxan halkani idin ku soo arurinay inyar oo warbixin ah, oo loo baahanayo madaama aad ka qeyb-qaadanaysaan fasalka qoyska ee iskuulkan. Iyada oo loo adeegsanya eegid guud ahaan, oo la eegayo ardeyga, ayaa abuuraya shardi, taa oo noqonkarta isbeddel wacan. Fasalka qoysku waa fursad uyeel ardey kasta oo sida ay ahaatoba aan isticmaaleyn itaalkiisa oo idil amma fursadiisa ugu sareeysa ee waxbarashada muhiimna u ah.

- **Uljeedada fasalka qoyska**

- In la siiyo adeyda fursad, ay ku hormariyaan, karaan-kooda cilmi, heraarka bulshada iyo (dareenka) shaqsika sida u dareemikaro.
- In ardeyga lagu dheerigaliyo isbeddelid mas´uuliyeed isla markaana noqoto isbeddel la cabbiri karo.
- In waalidiinta lasiiyo fursad mas´uuliyeed ay kaga qeyb-qaatan hormarinta cilmi kororsiga ee carruurtooda.
- In la siiyo waalidiinta & macallimiinta fursad ay ku arkaan wax baridooda oo ayna wax ka beddelaan caaday-sigooda wax dhigga amma sida ay wax u baraan ardeyda.
- Si wadajir ah ayey guriga & iskuulka ay fursad wax ku baddelaan ka helayaan.

- **Goorma, xaggee & Habkee?**

- Khamiis walba saacadda **08:10-11:00** ayaa la galaya fasalka qoyska ee Bäckskolan.
- Halkaas adiga iyo carruurta si wadajir ah ula shaqaynaya **barayaasha** fasalka qoyska iyo carruurta kale iyo waalidiintooda oo iyaguna meesha ku sugan.
- Fasalka qoyska wuxuu soconayaa muddo 12 usbuuc, taas oo aan yeelan doono 3 kulan, bilowga, bartamaha iyo dhammaadka usbuuca ugu danbeeya.
- Ulajeedada 3 kulan. **1)** In si wadajir u yeelano gool, tiigsi, oo aan dalbanno goosha carruurta ugu muhiimsan in uu gaaro. **2)** Qiimayn **3)** Na´tiijo.
- Howsha aan qabandoono waa mid la taaban karo, la qiimaynayo oo isla markaana muuqaal loo yeelayo iyo hormarin.
- Usbuuc-dhaaf waxaan leenahay kulan waalidiin-kooxeed & waddashaqeyn ka dhaxeysa laanta Lataliska & Garab-siinta (Råd och Stöd) ku taala Berga

- **Hal maalin ee fasalka qoyska.**

- **Saacadda: 08:10-08:40 (morgonrunda) wada hadal, wax is weydiin.**

- **Saacadda: 08:40-09:40 (skolarbete/samarbetsövningar) howl-iskuleed/ howl-iskaashi.**

- **09:40-10:10 (Rast/ föräldragrupp) nasasho/ kooxda waalidiinta.**

- **10:10-10:40 (Skolarbete) howl-skuleed.**

- **10:30-11:00 (Reflektionsrunda) ka baaraan degid, laga fikirayo howshii la qabtay.**

- **Waxa lagaa rabo, codsanya, adiga waalid ahaan?**

- In aad doonaysid ka qeyb-qaadashada mus´uuliyada carruurtaada hormarintooda.

- Isbedeelkaas oo ah mida ugu muhiimsan oo suurta gelinaysa hormarin wanaagsan.

- Codsiga kale la idinika rabo waxaa ka mid ah in idinka oo walidiinta ah imaatan faslaka qoyska si ad howsha la qabataan carruurtina khamiis walba galinka hore.

- Waa muhiim idinka mus´uul ka ah carruurta in aad kasoo qeyb-gashaan fasalka-qoyska intuu cashirrada la dhiganayo. Haddey adiga oo mass´uulka ah aad iman kari weeydo, waxaa iman kara maalintaa gof kale oo ehel ah. Waa haddii aad isku af-garataan **barayaasha** meesha jooga/ ka shaqeya.


- Haddey dhacdo in aad iman karin mar, waa daruuri in aad la soo xirrito shaqalaha iskuulka. Meesha aad kala soo xiriiri karto lambaradooda waxaad ka helayaa buuggan dushiisa danbe. Guriga & iskuulka ayaa suurta gelin kara isbeddelka ugu wacan.

- **Fasalka qoyska waa hab, amma si.**

- Habka asalkiisu wuxuu ka soo jeedaa Ingiriiska waxa uuna ku saleysanyahay tijaabin khibradeed oo ah cilmi saynis aas-aaskiisu. Habkaas oo sii faafay, ilaa waddanka Danmark, halkaas oo lugu sii casriyeeyey laguna hormariyey mid waafajiya wax barashada maanta ee iskuulada.

- Habkan Iswiidhen wuxuu ka jiraa meelo kala duwan, laga bilaabo sannadkii 2000 bilowgiisa. Hab-nidaam-maayska aas-aaskiisu wuxuu ku saleysanyahay in adiga oo ah waalid aqoon buuxda u leh cunugaaga, ku garabsiinkara Fasalka-qoyska.

- Fikradu waxay tahay in ay curruurta barato ayna mas´uuliyad ka qaataan la dhaqankooda bulshada ayna hormariyaan, kana faa´ideystaan fursaddooda buuxda. Wadajir ayaa fursad beddelid ku sameyn karnaa.



**Tillsammans
möjliggör vi
förändring!**

